

AF-SOOMALI (SOMALI)



CITY OF BOSTON
Office of the Mayor
Martin J. Walsh

Maarso 21, 2020

Degenaha Qaaliga Ah,

Wakhtigani waa wakhti adag oo qoysaskeena, asxaabteena, jaarkeena iyo bulshadeenaba soo maray. Magaalo ahaan, waxaa iminka la joogaa wakhtigii la isku iman lahaa, oo markaa qofba qofka kale ilaalin lahaa. Waxaan rabaa in aan micneeyo micnaha uu u leeyahay cudurka faafaha ah ee COVID19 (Karona fayras) adiga iyo qooyaskaaga, iyo sida aad gacan uga geeyan karto ka hortaga ku faafida fayraskan Boston.

Waxa aanu ugu baaqaynaa dadka inay taxadiraan oo ay naftoodana xanaaneeyaan. Waxaa jira wax yar oo fudud oo qof kastaa samayn karo oo wax wayn ah:



- Inaad ku gacmaha maydho badanaa saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbidhiqsi.
- Inaad isticmaasho gacmo nadiifiyaha alkohoosha leh ee alkohooshiisu tahay 60%.
- Dadka inaanad gacan qaadin.
- Waxa aad ku qabsataa jiqilka ama kilinikis afka iyo sanko marka aad hindhisayso ama qufacayso.
- Waxa aad si joogto ah u nadiifisaa oo aad jeermiska uga dishaa jeermiska shayada iyo meelaha badanaa la taabto.
- Waxa aad iska ilaalisaa inaad u dhawaato dadka xanuunsanaya.
- Fadlan xasuuso waxa ay ka dhigan tahay **kala fogaanshaha dadka**: Waxa aad iska ilaalisaa inaad meelaha ay dadku iskugu yimaadaan. Waxa aad u jirsataan ugu yaraan 6 fuudh dadka kale marka aad banaanka usoo baxdo.
- Hadii aad u aragto inaad xanuunsanayso, la hadal dhakhtarkaaga ama 311 si aad ula hadasho Khadka Caafimaadka Duqa. Waxa aanu ka dalbanaynaa dadka inay marka hore soo hadlaan, kahor inta ayna qaban qaybta gurmada degdega ah si markaa ayna dadku u harqin ER-keena.
- Waxa aanu sidoo kale dadka ka dalbanaynaa inayna lasoo hadl 911 iyaga oo xaalad caafimaad oo degdeg ah qaba moojee. Boston EMS ma saymo shaybaadhka COVID-19.

Waxa aan rabo dadku inay ay xusuustaan waxaa weeye ma ah kaliya in aad nafsadaada taxadarkan u sameeneeyso, waxaa kalood caafimaad u horseedeeysa magaalada yada oo dhan. Waxaa se kasii muhiimsan, waxaad badbaadineeysa dadka magaaladeena ugu nugul:qaasatan dadka d'ada ah iyo adka caafimaadkooda uu hooseeyo.

Boston, waxa aanu ka taxadiraynaa xaaladan si aad ah. Dugsiyada Shacabka Boston way xidhan yihiin oo waxa dib loo furayaa Isniinta, Abriil 27. Liiska meelaha cuntada laga qaadanayo waxa loogu lifaaqay qoysaska u baahan inay usoo qaadaan cuntada caruurtooda.

Waxa aanu raacaynaa bannooda gobolka oo dhan ee Badhasaabka Baker ee lagu mamnuucayo inay isku yimaadaan wax ka badan 25 ruux iyo sidoo kale lagu mamnuucayo meelaha cuntada lagu cuno ama baarka wax laga cabo iyo maqaaxiyaha ilaa Abriil 5.

Tani waa xaalad aad isku soo taraysa, oo xaalada iyo bannoodu way is badali kartaa. **Waxa aanu sii wadi doonaa in macluumaadka ugu aanu kula socodsiiino dadka deegaanka ah [boston.gov/coronavirus](https://www.boston.gov/coronavirus)**, taleefan cajalad soo hadlayso oo dadka waayeelka lala soo hadlayo, baraha bulshada @marty_walsh and @HealthyBoston Twitter iyo City of Boston Facebook), AlertBoston fariimo qoraal ah, iyo macluumaadka sida joogtada ah looga baahinayo saxaafada. Hadii aad ka shakido wax macluumaad ah oo aad maqashay, fadlan la hadal Khadka Kaalmada Duqa ee 3-1-1.

Waxa aan qof kasta uga mahadnaqayaa caawimaadiisa: shaqaalaha caafimaadka iyo xirfadlayaasha, qoysaska iyo jaarka, macalimiinta, hogaamiyayaasha bulshada, iyo dhamaan kuwa muujiyay waxa ay ka dhigan tahay Boston xoogan. Waxa aanu samaynaynaa wax kasta oo nala gudboon si aanu u ilaalino caafimaadka iyo amaanka Boston. Anaka oo magaalada matalayna, waxa aanu kaaga mahadnaqaynaa hawsha aad dhankaaga qabatay.

Mahadsan,

Duqa Martin J. Walsh

MUHIIM!

Dukumintigaan waxaa ku jira **macluumaad muhiim ah**. Wixii agabka luuqada Soomaali ah fadlan booqo:

<https://www.boston.gov/covid19#more-resources>